Helsinki

Työllisyyspalvelut
Sysselsättningstjänster
Employment services

Tijaabadda shaqo galinta degmada ayaa bilaabanaysa sannadka 2021

Adeegga shaqalaaysiinta ee Helsinki hiigsigiisu waxa weeyaan in sida wakhti xaadirkan jirta si ka badan loo horumariyo shaqogalinta dadka shaqo la'aanta ah ee shaqo dalbanaya iyo in lagu hago tababarada iyo sidoo kale in xal loo helo sida loo heli lahaa xoog shaqo oo xirfad leh.

Bandhig kooban

Tijaabada shaqogalinta ee degmadu waxaay ku soo biirinaysaa macaamiilnimada adeegga shaqaalaysiinta ee Helsinki ku dhawaad 50 000 oo qof oo Helsinki deggan oo uga imanaya xafiiska shaqo la'aanta. Isbaddalkani waxaa uu hirgalayaa 1.3.2021 Isbaddalkan wuxuu keenayaa in xafiiska shaqo la'aanta ay magaalada uga soo wareegaan qiyaastii 250 shaqaale iyo in xarumo shaqo looga furayo Itäkeskus iyo Pasila.

Waa maxay tijaabada shaqogalinta ee degmadu?

Muxuu yahay tijaabada shaqogalinta ee degmadu?

Tijaabada shaqogalinta ee degmadu waa mashruuc waddanka dhan ka jira oo soconaya 2,5 sano. Qayb kamid shaqooyinka sharcigu dhigayo ee xafiiska shaqo la'aantu uu qabanqaabiyo ayaa u wareegaya degmada. Tijaabada degmada waxaa ku jira 125 degmo iyo 26 nawaaxi oo tijaabada laga fulinayo oo degmooyinku ay ka koobmayaan. Helsinki oo kali ah ayaa mid ka ah nawaaxiga tijaabooyinka. Nawaaxiga caasimadda waxaa Helsinki dheer oo iyaguna nawaaxiyo tijaabo ah Espoo, Vantaa iyo Kerava.

Waa maxay sababta arrinkan loo qabanqaabinayo?

Tijaabada degmada ujjeedadeedu waxaa weeyaan in la xoojjiyo adeegyada shaqaalaysiinta saamaynta ay leeyihiin iyo adeegayada kala duwan ee shaqo dalbadeyaashu ay helayaan iyo khibradooda macaamiilnimo. Tan waxaa loogu talogalay in loo fuliyo iyada oo la fududaynayo degmooyinku adeegyada ay bixiyaan sida loo helayo. Saamaynta ay leeyihiin waxaa loo xoojinayaa iyada oo la isku darayo shaqaalaha degmada iyo kuwa dowladda, maalgalinta iyo goobaha lagaga shaqaynayo arrimaha shaqogalinta.

Arrinkani miyuu i khuseeyaa aniga?

Tijaabada degmada iyo adeegyada u soo wareegaya magaalada Helsinki sida ay u badantahay way ku khuseysaa adigana haddii aad tahay qof deggan Helsinki oo shaqo dalabade shaqo la'aan ah ama haddii aad ka qayb qaadato adeegyada shaqaalaysiinta oo arrimahan xiga ay adiga ku khuseeyaan:

- haddii aad ka yartahay 30 sano
  ama
- haddii aad luqadda waddanka luqad aan ahayn aad ku hadasho Haddii luqaddaada hooyo ay tahay luqad kale oo aan finish ahayn.
  ama
- haddii tusaale ahaan aanad xaq u lahayn lacagta maalinlaha ah ee takhliga Aad hesho tusaale ahaan lacagta shaqo la'aanta ee Kela-a, lacagta taakulaynta nolosha ama lacagta maalinlaha ah ee xanuunka.

Waxaad wali helaysaa warqad shaqsiyen adiga kugu socota oo ka socota xafiiska shaqo la'aanta iyo macluumaadka wareejjinta oo ad ku helayso adeegga Oma asiointi, haddii aad u wareegto tijaabada degmada.

Saamaynta isbaddalku uu aniga igu leeyahay?

Goorma ayaay tijaabadu socotaa?

Tijaabada degmooyinku waxaay socotaa 1.3.2021 – 30.6.2023.

Isbaddalkani miyuu saamayn ku leeyahay taakulayntayda amniga shaqo la'aanta?

Isbaddalkani saamayn kuma laha taakulaynta amniga shaqo la'aanta ee hore laguugu oggolaaday.

Tijaabada degmada ee shaqo galintu marka ay bilaabato haay'adda taakulaynta shaqo la'aantaada bixisa (KELA ama qasnadda shaqo la'aanta) warbixinta siyaasadda shaqo la'aanta ku saabsan ee ay kaa bixiyeen ayaa wali sii shaqaynaya kaddib marka aad u wareegto adeegga shaqo galinta ee Helsinki. Tijaabada degmadu shaqo kuma laha falanqaynta arrinkaaga amniga shaqo la'aanta ee Kela-da ama qasnadda shaqo la'aanta. Cusboonaysiintan saamayn badan inaay ku yeelato ma aha taakulayntaada shaqo la'aanta dalbashadeeda ama oggolaanshaheeda jadwalka ay Kela-du ama qasnadda shaqo la'aantu ku waddo.

Bilowga isbaddalka adeegga magaaladu waxaa uu ahaan karaa mid mashquul yar gala marka laga eedo dhanka gaadhidda go'aamada cusub. Waxaa kuu wanaagsan inaad iska ilaaliso go'aamada ama waxqabadyada aqbalaadda u baahan muddada kala wareegga lagu jiro, haddii aad adigu innaba arrinkaas saamayn ku yeelan karto.

Maxaa la iiga baahanyahay inaan anigu sameeyo isbaddalkan dartii?

Shaqo dalbade ahaan waxba lagaagama baahna in aad isbaddalkan dartii u samayso.

Qorsheyaashaadii hore ee shaqaalaysiinta ama qorshayaashaada kale ayaa wali kuu shaqaynaya. Nawaaxigaaga tijaabada degmada adeegayada shaqo la'aanta ee ay bixiyaan ee dadka deggan Helsini u ah **adeegayada shaqo galinta ee Helsinki** waxaay la soo xidhiidhayaan macaamiil kasta oo shaqo dalbade ah isla marka loo doorto khabiirka isaga ka mas'uulka ah. Wakhtiga doorashada waxaan kuu soo diraynaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegga shaqo galinta ee Helsinki iyo maaamiilnimaadada.

Miyaan sii lahaanayaa khabiir mas'uul iga ah mustaqbalka xattaa? Miyuu isbadalayaa khabiirka mas'uulka iga ah?

Hadda kaddib xataa ku dhawaad macaamiil kasta oo shaqo dalbade ah wuxuu yeelanayaa khabiir ka mas'uul ah.

Khabiirka mas'uulka kaa ah sida ay u badantahay wuu isbaddalayaa marka uu adeeggu u wareego degmada. Khabiirka mas'uulka kaa ah ee cusub waxaa la go'aaminayaa wareejinya kaddib sida ugu dhakhsaha badan ee suuro gal ah. Waxaa warqad ahaan laguugu soo dirayaa macluumaadka ku saabsan khabiirka kaa mas'uulka ama waxaa laguu galinayaa adeegga Oma asiointi isla marka laguu dooro. Macluumaadkan waad helaysaa xataa haddii khabiirka kaa mas'uulka ah uu isbaddali waayo.

Waxaad ka fili kartaa macluumaadka khabiirka kaa mas'uulka ah adeegga shaqo galinta ee Helsinki.

Miyuu arrinkani xadayn karaa adeeggayga?

Tijaabada degmadu markaa ay kuu bilaabato waxaad ka adeeganaysaa oo kaliya adeegga shaqo galinta ee degmadaada u gaarka ah.

Tusaale: Qof Helsinki deggan ayaa ku nool meel u dhoow adeegga xafiiska shaqo la'aanta ee Vantaa, sababtaas ayuu markii hore xafiiska Vantaa uga adeegan jiray. Inta tijaabada degmadu ay socoto suuro gal uma aha in uu ka adeegto adeegga shaqo la'aanta ee xafiiska shaqada ee Vantaa.

Shaqo dalbadaha macaamiil ka ah tijaabada degmada waxaa loogu adeegi karaa oo kaliya degmada uu degganyahay adeegga shaqo galinta ee ku yaalla.

Adeegga aan helo miyuu isbaddalayaa?

Marka aad macaamiil ka tahay adeegga tijaabada degmada waxaad helaysaa isla adeeggii aad markii hore ka heli jirtay xafiiska shaqo la'aanta. Adeegga magaalada Helsinki waa laga yaabaa in isbaddalo yar ay ka jiraan maaddaama macaamiisha tiradoodu si wayn ay isku baddalayso.

Helsinki

Työllisyyspalvelut
Sysselsättningstjänster
Employment services

Muddada tijaabada shaqo galinta degmada waxaan kobcinaynaa adeegyo cusub iyo xalal loogu talo galay daryeelka shaqo la'aanta, waxaanan xoojjinaynaa wadashaqaynta aan la leenahay tusaale ahaan adeegyada sooshalka iyo caafimaadka iyo kuwa barbaarinta iyo tababarada si aan u horumarino shaqo galinta. Taas macnaheedu waxaa weeyaan in fursaddaada adeeggu ay balaadhan karto muddada tijaabada degmada lagu jiro.

Waxaan ahay macaamiil TYP ah. Adeeggaygu miyuu isbaddalayaa?

Hadda kaddib xataa waad helaysaa adeegga TYP, laakiin tijaabada degmada qaabka loogu qabanqaabinayo ayaa sidii hore ka duwanaanaysa. Taas macnaheedu wuxuu noqon karaa in goobta macaamiilnimadaadu ay isbaddalayso ama in khabiirka kaa mas'uulka ah uu isbaddali karo.

Sharciga horumarinta shaqo galinta ee adeegyada wadajirka ah baaxadda leh isma baddalayaan muddada tijaabada degmada waxaanan ku magacaabaynaa adeegyadan *adeegyada kobcinta shaqada.*

Luqadaheen ku heli karaa adeegga?

Luqadda finishka iyo luqadda swidhiska mar kasta adeeg waad ku helaysaa. Badanaa adeegga waxaad ku heli kartaa luqadda ingiriiska iyada oo aanan u baahnayn shaqo dheeraad ah ama ballan qabsasho.

Adeegga turjumaanka waxaa markasta loo qabanqaabinayaa cidda u baahan, sidii xafiiska shaqo la'aanta oo kale.

Halkeen ka heli karaa adeegga?

Halkeen ka heli karaa adeegga haddii aan u wareego macaamiilnimada adeegga shaqo galinta ee magaalada Helsinki? Wakhti kala wareegga ahna?

Internetka waxaad isticmaali kartaa adeegga xafiiska shaqo la'aanta ee Oma asiointi sidii caadiga ahayd isaga oo bilaa hakad ah.

Taleefanka waxaad ka heli kartaa adeegyada shaqo galidda iyaga oo bilaa hakad ah, waxaanad ka helaysaa xafiiska shaqo la'aanta lambarka taleefanka ee ay hayaan: **0295 025 500** (isniin–jimce saacadda 9.00–16.15)

Adeegga taleefanka waxaad caawimaad ka heli kartaa markaa aad danaysanayso, marka aad rabto inaad isticmaasho adeegga internetka ah ee Oma asiointi iyo arrimaha ku saabsan shaqo galidda. Haddii aad u baahato hagitaan dheeraad ah ee ku saabsan adeegyada kale ee kugu habboon adiga waad heli kartaa.

Helsinki

Työllisyyspalvelut
Sysselsättningstjänster
Employment services

Waxaad heli kartaa adeegga daaradda xafiiska kaddib marka la bilaabo tijaabada degmada sannadka 2021 bilowgiisa, waxaanad ka helaysaa ciwaanadan hoos ku qoran:

- Asiakkaankatu 3 oo Itäkeskus ah
- Ratapihantie 7 oo Pasila ah
- Dadka ka yar 30 jir waxaay ka helayaan Ohjaamo oo ku yaalla Fredrikinkatu 48 oo Kamppi ah.

Haddii aad ballan ka qabsato waxaad adeegga ka heli kartaa oo kale ciwaanka Viipurinkatu 2 iyo Runeberginkatu 5.

Adeegga macaamiisha ee waji ka wajiga ah waxaa uu hirgali karaa kolba sida ay xaaladda koronahu u saamaxdo.

Helsinki info waxaad ka heli kartaa la talin adeegga Helsinki ku saabsan oo tusaale ahaan ku saabsan wakhtiyada furnaanshaha xafiisyada ama macluumaad aasaasi ah oo kale.

Lambarka taleefanka ee Helsinki info: **09 310 11 111** (isniin–khamiis saacadda 9–16 iyo jimce saacadda 10–15)
chat- ka Helsinki info (isniin–khamiis saacadda 9–16 iyo jimce saacadda 10–15)

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeri ah?
Waxaad ka akhrin kartaa macluumaad dheeri ah bogaggan xiga:

Tijaabadda shaqo galinta ee degmada bogga hel.fi
Tijaabadda shaqo galinta bogga shaqalaysiinta iyo qutul duruuriga
Adeegga shaqo galinta Helsinki tTwitterka

Fadlan la soco waxyaabaha cusub ee boggan la soo galiyo iyo saxaafadda kale sida jaraa'iddada iyo wararka telefishinka.

Waxaad sidoo kale noogu soo diri kartaa wixii faalbixin ah e-mail ahaan ama su'aalaha guud ee aad hayso waxaad ku soo gudbin kartaa bogga adeegga shaqo galinta ee Helsinki ciwaanka tyollisyyspalvelut@hel.fi. **Fiiro gaar ah u yeelo!** E-mail ahaan kuma suuro galin karno adeegyada shaqsiga ah ee u baahan aqoonsashada qofka. Fadlan, hanoogu soo dirin e-mail ahaan macluumaad xasaasi ah oo tusaale ahaan

ku saabsan xaaladdaada nololeed ama xaaladdada caafimaad ama macluumaadkaaga shaqsiga ah. Waxaan e-mailka kaga jawaabi karnaa oo kaliya su'aalaha guud waxaanan gudbin karnaa wixii faalbixin ah ee naloo soo gudbiyo.

Halkeen shaqo la'aantayda ku diwaangalin karaa?

Diwaangalinta shaqo la'aantu waxaay wali ka sii socotaa adegga xafiiska shaqo la'aanta sidii caadiga ahayd. Waxaad shaqo la'aan inaad tahay iskaga diwaangalin kartaa adeegga Oma asiointi ama xafiiska adeegga xafiiska shaqo la'aanta. Adeegyada xafiiska shaqo la'aanta ayaa ku hagaya macaamiisha tijaabada degmada adeegyada degmooyinkooda ee shaqo galinta.